



## Daadadka

### Baro Kalmadaha Loo Isticmaalo in lagu Qeexo Daadadka

- Dusha Kala socoshada Daadka: Inay daadad dhacaan ayaa suurtogal ah. Digniinaha waxaa soo saara Adeegga Cimilada ee Qaranka (National Weather Service, NWS) 12 illaa 36 saacadood ka hor dhacdo ay suurtagal tahay inay dhacdo.
- U diyaar Garawga Daadka Lama Filaanka ah: In daad lama filaan ahi dhaco ayaa suurtogal ah. U diyaar ahoow inaad u guurto dhul jooggiisu sarreeyo. Daadka Lama Filaanka ahi waa uu dhici karaa iyadoon digniin hore jirin.
- Digniinta Daadka: Daadad ayaa socda ama dhawaan ayay dhici doonaan. Haddii lagu talo bixiyo inaad guurto, sidaasi samee islamarkaba.
- Digniinta Daadka Lama Filaanka ah: Daad lama filaan ah ayaa socda. Raadso dhul sare islamarkaba kana fogow marinada biyaha iyo janbiyada biyo mareenada.

### Maxaa ay tahay inaad Samayso haddii Daad Dhaco

- Haddii aad la kulanto daad, HA ISKU dayin inaad lug ama gaadhi kaga gudubto.
- La soco warbixinaha Warbaahinta.
- Weydii saraakiisha maxalliga ah in hantidaadu ay ku taal meel daad mareen ah ama goob khattarteedu sarrayso. khariiradaha daadadku waa ku diyaar inta badan xafiisyada ama goobaha maamulka degmada.
- Dhagayso saraakiisha Amniga Dadweynaha ee heer deegaan iyo heer gobol ugana fal celi tilmaamohooda ay kugu hagayaan sida ugu dhakhsiyaha badan.
- Ogsoonow wadiiqooyinka ugu wanaagsan ee aad uga baxsan karto daadka, hoy-yada dadweynaha, iyo halka laga helayo dhul joog sare leh. Marka daad lama filaan ahi dhaco, waxa aad u baahan kartaa inaad raadsado dul joog sare leh adigoo lug ku raadsanaya sida ugu dhakhsiyaha badan.

### Waxa lagaa rabo inaad samayso si aad isugu Diyaariso Daad

- Ku xidh ‘check vavles’ biyo celiyaha (sewer traps) si aad uga hortagto biyaha dadku inay dib ugu soo noqdaan qasabadaha biyaha gurigaaga ka saara.
- Hubi oo xaqiji in gurigaagu yahay diyaar. Marka ay suurtogalka tahay, yaree waxyeelada kaaga imanaysa daadka guriga soo gala adigoo kor uqaadaya weelasha iyo walxaha uu waxyelain karo daadkaasi xaddidani.
- Ku adkee tanagyada shidalka meel si aanu daadku uqaadin, tanoo ku keeni karta arrin dhanka amniga iyo deegaankaba ah gudaha iyo dibada gurigaaga.
- Samayso Agabka Xaalada Degdegga ah ee Qoyska.
- Samee Qorshaha Wada Xidhiidhka Qoyska. U qoondée qof qaraabo ah oo ku nool gobolka dibadiisa inuu noqdo qofka lala xidhiidhayo.
- U diyaar garow inaad damiso korontada marka ay jiraan biyo taagani, biraha laydhka oo soo dhacay, ama ka horba inta aydaan ka guurin guriga. Baro sida si ammaan ah loogu xidho gaasta iyo biyaha ka hor inta aanad ka guurin guriga.
- La xidhiidh wakiilkaaga caymiska ama dawlada hoose si aad ugala xaajooto caymiska daboolaya daadka.